



Seattle
Parks & Recreation

Aan u Dabaaldego Furitaanka Xeebta ee Rainier Beach!

Kaalay la dabbaaldego guddiga Rainier Beach Link2Lake (Link2Lake), Seattle Parks and Recreation, iyo bulshada Rainier Beach marka aan bilaabayno dhismaha Be'er Sheva Park! Nagu soo biir musaabada maalinta:

Sabti, Abriil 1

12:DUHURNIMO- 3:00 GALABNIMO

Be'er Sheva Park

8650 55th Avenue South, Seattle, WA 98118

Munaasabadda waxay soo bandhigi doonta bandhig faneed ay soo bandhigi doonaan faaniin firfircoon ee deegaanka ah, fasalada jir-dhiska ee Rainier Health and Fitness, cunto macaan, iyo madadaalo loogu talagalay dadka oo dhan ah. Soo xaadirayaasha waxay heli doonaan fursad ay iskaga kaashadaan farshaxanka bulshada ee lagu rakibi doono beerta.

Waxaan kugu casumaynaa inaad wax badan ka barato bulshada ay wado, hagaajinta xadiiqadaha ee ay bulshadu nashqadayso ee bilaabmaya gu'gan! Guddiga Link2Lake wuxuu u shaqeeyay si hagar la'aan lixdii sano ee la soo dhaafay si ay uga dhigaan Be'er Sheva Park mid dib loogu qurxiyay bulshada Rainier Beach. Qaar ka mid ah xarumaha aadka loo sugayo waxaa ka mid ah gelitaanka xeebta oo la hagaajiyay, waddo laami ah oo la taaban karo, meelo la isugu yimaado oo daboolan, wadooyimka lugaynta ee nalka leh, BBQ-yada iyo miisaska cuntada, heerka waxqabadka dhaqameed, iyo hagaajinta deegaanka salmon.

Munaasabaddan waxaa la martigeliyay iyadoo lala kaashanayo Rainier Beach Action Coalition iyo Seattle Neighborhood Group, kuwaas oo ururin doona talooyinka bulshada si ay ugu wargeliyaan mashaariicda mustaqbalka ee jidka Henderson Corridor..

Guddiga Rainier Beach Link2Lake waa koox aasaasi ah oo ka kooban shuraako bulsheed oo u go'ay iyo deganeyaalku kuwaas oo markii ugu horeysay shiray 2016 iyaga oo ujeedadoodu tahay in la abuurro marin nabdoon, socod lug ah oo gaar ah oo xuddun u ah South Henderson Street kaas oo isku xira Rainier Beach Light Rail Station ilaa xeebaha Lake Washington ee ku taala Be'er Sheva Park..

Wax badan ka baro <https://rainierbeachlinktolake.org/>.

Macluumaadka ku saabsan dhismaha s u cusboonaysiinta beerta fadlan booqo <https://www.seattle.gov/parks/about-us/projects/beer-sheva-park-improvements>

Somali